



## Kala qaybsiga sheekoyinka

Adigu mar walba uma baahnid inaad qaybsataan ereyoyinka. Isla eegida iyo ka wada hadalka sawirada buugaagta waa hab fiican aad ilmahaada ku dhirrigelin kartid ku raaxeyisiga sheekoyinka. Haddii guriga ku hadasho luqad kale, luqadaada isticmaal markaad ka hadlayso sawirada iyo sheekada buugga.

Markaad buug kala qaybsaneysaan waad isla madadaali kartiin:

- Ka hadla daboolka buugga iyo u tilmaam magaca buugga.
- Ilmahaada u oggolow inay buugga gacantooda ku haayaan iyo geddiyaan bogagga.
- Ku dhirrigeli inay ka hadlaan sawirada buugga.
- U isticmaal codad kala duwan jilayaasha sheekada buugga. Dhawaaqyo samee sida dhawaaqa biiyaha, hoonka baabuurka ama dhawaaqa xayewaanada.
- Markii ay sheekada dhamaato, waxaad ka codsan kartaa haddii ay ka heleen iyo jilaha ay ugu jecel yihiin sheekada.

### Talada xiddigta

Teendho isla sameeyaa (maro saar miis korkiisa), si booska labadiina idin deeqo. Waxaad teendhadaada ka dhigi kartaa qayb ka mid ah sheekada - wuxuu ahaan karaa guri yar oo bahal ku jiro, dayuuradda hawada sare tagto, ama munaaradda boqoradda.



**Miyaad ogeed** carruurta ay waalidkooda si joogto ah wax u aqriyey markii ay ahaayeen shan jir waxay si ka fiican ugu guuleysteen imtixaanada xisaabta, aqoonta ereyoyinka iyo hikaadinta xarafyada markii ay gaaraan 16 jir markii loo barbardhigo carruurta sidaan loo caawinin?<sup>5</sup>

**Miyaad ogeed** in carruurta badanaa ay leeyihii sheeko ay ka jecel yihiin inay maqlaan si noq-noqod ah? Kani wuxuu ku caawinayaan barashada sida ereyoyinka u kala hormaraan iyo waxay sheekada ku xiraan ereyoyinka qoran – kuwaaso ah tallaaboyinka koowaad ee lagu barto wax aqrinta!

### Fikrada sheekaysiga

U sheeg ilmahaada wixii aad sameyn jirtey markii adigaba ilmo ahayd. Qoyska oo dhan ha ka qayb-galo - awoowayaasha ayaguba waxay lahaan karaan sheekoyin ku saabsan markii ay ilmo ahaayeen!